



NORWEGIAN MINISTRY OF
JUSTICE AND PUBLIC SECURITY

Guide on how to avoid terrorist funding

Deeqda aad u bixiso si khaldan ayaa loo isticmaali karaa





Deeqda aad bixiso si khaldan ayaa loo isticmaali karaa

1. Lacag u aruurinta arimaha sadaqada

Norway gudaheeda, lacag u aruurinta arimaha sadaqada ee ururada iyo kooxaha waa arin fiican waana mid soo jireen ah.

Lacago ayaa la aruuriyaa iyadoo lala xiriirinayo masiibooyinka khatarta ah dhibaatooyinka bani'aadamnimo ee ka dhaca daafaha adduunka. Tiro Lacago ah oo aad u badan ayaa la aruuriyaa iyadoo la samaynayo ololeyaal sadaqo oo kala duwan, sida ololaha sanadlaha ah ee "TVga-aksjonen".

Taas waxaa la socda, inay jiraan aruurin iska socota oo loogu tala galay xafladaha gaarka ah ee ay soo abaabulaan ururro iyo kooxo badan. Aruurinta noocan oo kale ah ayaa sidoo kale waxaa sameeya oo abaabulo gudiyo diimeedyada kala duwan, sida lacag u aruurinta adeegyada kaniisadda iyo salaadda Jamcaha ee masaajidda.

Lacagaha la aruuriyo waa qayb wayn oo ka mid ah ra'sumaalka ay haystaan ururada kala duwan iyo jaaliyadaha si ay ugu taageeraan mashaariicdooda khayriga ah.



2. Taageeridda argagixisanimada

Gabi ahaanba hubi inta aadan deeq bixin. Haddii aad ka shakisan-tahay meesha ay lacagtaadu ku socoto ama waxa loo isticmaalayo, sug intaadan bixin deeqda.

Waxaa jirta sabab lagu aamino in lacagaha laga aruuriyo Norway mar loo isticmaalay in lagu maalgaliyo argagixisanimada ama ay gacanta ku dhigaan kooxaha laga yaqaanno inay u isticmaalaan argagixisanimada aalad ahaan.

Khibradda caalamiga ah ee la helay waxay sheegaysaa in ururo la aas aaso iyadoo ay ujeedadooda qura tahay inay taageeraan argagixisanimada iyo kuwa ku lug leh argagixisanimada. Tanna waa arin mudda dheer diiradda la saarayay caalami ahaan iyo wadan ahaanba.

Norway gudaheeda, sida wadamada kaleba, waxaan soo saarnay shuruuc iyo xeerar lagaga hortagayo in maal ama taageero kalaba loo gudbiyo shakhsiyaadka ama ururada taageera ama ku lug leh argagixisanimada.



Maalgalinta argagixisanimada waa fal danbiyeed

ee Xeerka Ciqaabta Norway § 147 b

Xanibaadda maalgalinta argagixisanimada waxay ku jirtaa Qaybta 147 b ee Xeerka Ciqaabta Norway. Qeexidda sharciga ah ee falka argagixisanimada waxaa laga helayaa Qaybta 147 a ee Xeerka Ciqaabta Norway.

Maalgalinta argagixisanimada ama gargaaridda iyo caawinta falka caynkan ah waxaa ka dhalan karta ciqaab xabsi oon ka badnayn 10 sano.

Waa fal danbiyeed in:

- Loo gudbiyo lacag ama ra'sumaal kale shakhsiyaadka, kooxaha, ururada, ama shirkadaha taageera ama ku lug leh falalka argagixiso
- Loo aruuriyo lacag shakhsiyaadka, kooxaha, ururada ama shirkadaha taageera ama ku lug leh falalka argagixiso
- Loo diyaariyo lacag, ra'sumaal kale, adeegyada bangiyada ama adeegyada kale ee dhaqaale shakhsiyaadka, kooxaha, ururada ama shirkadaha taageera ama ku lug leh falalka argagixiso
- La taageero mashaariicda sida dadban qayb uga noqon kara aas aasidda ama shaqooyinka koox argagixiso ah

3. Hababka aan sharciga ahayn ee lacag gudbinta

Sanadkasta malaayiin kroner-ka Norwijiyaanka ah ayaa laga diraa Norway oo loo diraa dibadaha iyadoo la marayo habka aan sharciga ahayn ee lacag gudbinta, eeloo yaqaanno bangiyada xawaaladaha. Inta badan lacagahan waxaa loo diraa xubnaha qoysaska si loogu caawiyo iyo siyaalaha kale ee wanaagsan ee qaybaha kale ee adduunka.

Bangiyada xawaaladaha waxay khatar gaar ah ugu jiraan arinta la xiriirta maalgalinta argagixisada. Sida badan qofka ku howlan hababka aan sharciga aheyn ee lacag gudbinta ma uu hayo xogta saxda ah ee cidda helaysa lacagta iyo waxa loo isticmaali doono. Taa waxaa sii dheer, waxaa jiri karta khatarta in qaybo ka mid ah lacagaha shakhsiyaadka (kharashaadka/lacagta la bixiyo) ay caawiso maalgalinta kooxaha argagixisada ah.

4. Kharashyadda Argagixisada

Waxaa jira qorshe wakhti dheer ah iyo kharashyo la xiriira oo ka danbeeya khidmadda falalka argagixisada. Marka ay xoogaysato maalgalinta kooxaha argagixisada ah, waxaa sii weynaada awoodda ay kooxuhu u yeelanayaan inay fuliyaan falalkooda. Khatartu way yaraanaysaa haddii dhaqaalahooda uu yaraado.

5. Lacagtaada si saxsan u isticmaal

Waxaad samayn kartaa wax aad adiga iyo ururkaaguba iskaga ilaalin kartaan lacag u aruurinta shakhsiyaadka ama arrimaha la xiriira aragagixisada.

- Baaritaan samee oo isticmaal dareenkaaga.
- Hubi ujeedada ururka aad deeqda siinayso, cidda ay la shirkada yihiin iyo maamulkooda. Ogow sumcaddooda..
- Waydii kuwa lacagta aruurinaya su'aalo aad ku baaraysid iyo tixraac xaqiijinaya daacadnimadooda. Tan waxaa ku jiri kara websaaydyada internet-ka, diiwaankooda Xarunta Dhexe ee Isku xirka Diiwaan galinta Hay'adaha Sharciga, keydkooda iyo natiijooyinka mashaariicdii ay horey u hirgaliyeen.



- Isticmaal shirkadaha leh sharci ay ugu gudbiyaan lacagaha dibada si ay ugu gudbiyaan lacagaha gaarka ah xubnaha qoyska iyo dadka kale ee dibadda .shar-ciyadda waxaa lagu ogaan karaa adigoo ka fiirinaya diiwaan galinta sharciyadda websaaydka Maamulka Ilaalinta Dhaqaalaha Norway, www.finanstilsynet.no.
- Hubi in ururka lacagta aruurinayo uu ka diiwaan gashan yahay Diiwaanka Lacag aruurinta. Diiwaanka Lacag aruurinta wuxuu u xaqiijiyaa dadka badankood in lacagaha ay ku deeqaan loo isticmaalo ujeedooyinka la sheegay. Iska diiwaangalinta diiwaanka waa bilaash. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan diiwaanka waxaa laga heli karaa www.innsamlingskontrollen.no.
- Ka fiiri ururka lacagaha aruurinaya Diiwaanka Dhexe ee Brønnøysund, www.brreg.no, iyo haddii ay suurtagal tahay, Diiwaanka Ururada oo laga heli karo Hay'adda Ururada, www.stiftelsestilsynet.no. Waxaad si fudud oo bilaash ah uga fiirin kartaa Diiwaanka ururada in ururku uu ka diiwaan gashan yahay oo uu ku taagan yahay ujeeddadii loo aasaasay. Taas waxaa sii dheer, waxaad heli doontaa liiska dhammaan xubnaha gudiga ee diiwaangashan iyo baare.
- Sidoo kale waxaad ka fiirin kartaa in ururka ama qofka lagu taageerayo deeqdaada uu ku jiro liistka UN-ta ee argagixisada. Liiska waxaa laga heli karaa websaaydka UN-ta, www.un.org/sc/committees/1267/aq_sanctions_list.shtml.
- Gabi ahaanba hubi inta aadan deeq bixin. Haddii aad ka shakisantahay meesha ay lacagtaadu ku socoto ama waxa loo isticmaalayo, sug intaadan bixin deeqda.

Published by:
Ministry of Justice and Public Security

This publication is available in PDF format here:
www.radikalisering.no and www.government.no/jd

Publication number: G-0428 (Somali)

Design/illustration: 07 Gruppen

